

**JAMHUURIYADDA
SOMALILAND**



**REPUBLIC OF
SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE**

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

Sannadka 9aad

Cadad 1aad

04/04/2020

**FAAFINTA RASMIGA AH EE SADDEX
BILOODLE AH
JANUARY TO MARCH 2020**

**Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web: www.garyaqaankaguud.com**

*Lama iibin karo
Not for sale*

Sannadka 2020



TUSMADA CADADKA

QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:

1. Dhaqan-galka Wax-Ka-beddelka iyo Kaabista **Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Xeer Lr.50/2020** (Cadad Gaar ah)
2. Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista **Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr.50/2020** (Cadad Gaar ah)

QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:

- | | | |
|-----|--|----|
| 3. | Xil Ka Qaadis | 2 |
| 4. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid | 3 |
| 5. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Cafis | 5 |
| 6. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Aasaaska Sanduuqa Horumarinta
Dhallinyarada Jamhuuriyadda Somaliland | 6 |
| 7. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Saamaxaad | 16 |
| 8. | Xil Ka Qaadis | 17 |
| 9. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid | 18 |
| 10. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Magacaabid Guddi | 19 |

QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:

11. SOOMA BIXIN

QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:

12. SOOMA BIXIN

QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

9. SOOMA BIXIN



QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-443/012020

Taar: 20/01/2020

Ku: Amaal Cabdi Xasan
Gudoomiye Ku-xigeenkii Hore ee Hay'adda
Dhawrista Tayada

Ku: Maxamed Aadan Xirsi
Agaasimaha Guud ee Komishanka Maamul
Wanaaga

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Sida aad la socotaan, xilka Qaranka ayey sunnihiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda manta aan idinka qaado xilalkii aad hayseen ee kalaa ahaa Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda iyo Agaasimaha Guud ee Guddida Maamul wanaaga.

Waxaan idiinka mahad-celinayaa muddadii aad hayseen xilalka Qaranka.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-444/012020

Taar: 20/01/2020

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
somaaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontooda, Kartidooda iyo
Waaya-aragnimadooda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karaan
Masuuliyadda ka Dhalanaysa
Xilalkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan go'aamiyey

In laga bilaabo taariikhda maanta aan xilalkan u magacaabo masuuliyiintan:

Tir	Magaca	Xilka
1	Cabdinaasir Axmed Xirsi Maxamed	Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga
2	Eng. Cabdiraxmaan Maxamed Muxummed	Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska



3	Cabdirisaaq Jaamac Nuur Naakhuude	Agaasimaha Guud ee Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah
4	Maxamed Yuusuf Ismaaciil	Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.
5	Axmed Cabdi Ismaaciil Caqli	Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Biyaha
6	Cabdiwaasac Maxamed Yuusuf	Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda Dhawrista Tayada
7	Axmed Cabdirisaaq Diiriye	Agaasimaha Guud ee Guddida Qandaraasyada Qaranka
8	Maxamed Axmed Xasan (Jabarti)	Agaasimaha Guud ee Hay'adda Duulista iyo Madaaradda
9	Maxamuud Ismaaciil Cilmi	Agaasimaha Guud ee Guddida Maamul Wanaaga

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-452/012020

Taar: 25/01/2020

Wareegto Madaxweyne

Cafis

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
somaaliland, Qodobka 90aad,
Xubintiisa 5aad;

Markaan Arkay: Xeerka Ciqaabta Guud,
Qodobkiisa 149;

Markaan Tixgaliyey: Warbixinta Taliska Guud ee
Ciidanka Asluubta ee
summaddiisu tahay TCA/G-
1/41/2020, kuna taariikheysan
12/01/2020;

Markaan arkay: Soo-jeedinta Xafiiska Xeer
Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee
summaddiisu tahay
XIG/JSL/371/2020 kuna
taariikhaysan 21/01/2020;

Markaan La-tashaday: Hay'adaha ay Khusayso;

Waxaan go'aamiyey

In laga bilaabo taariikhda maanta aan Cafis Guud u fidiyo
Maxaabiista dembiyada fudud ku xukuman ee xabsiyada dalka
ku xidhan, oo tiradoodu dhan tahay 311 (saddex Boqol Kow



iyo Toban) maxbuus. Cafiskani saamayn kuma laha xuduqda madaniga ah iyo raadka ciqaabedka ee ka dhalanaysa dembiyadda ay ku xukunnaayeen, sida ku xusan qodobka 92 ee Xeerka Ciqaabta Guud. Waxa cafiskan fulinaya Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, iyada oo la raacayo liiska Maxaabiista iyo Shuduudaha Wareegtadan ku lifaaqan.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-469/022020

Taar: 17/02/2020

Wareegto Madaxweyne

Aasaaska Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada Jamhuuriyadda Somaliland

Markaan Arkay: Qodobka 90aad, 11aad, 15aad, 16aad, iyo 20aad ee Dastuurka Jahuuriyadda Somaaliland.

Markaan Arkay: In dhallinyarada dalku budhig u yihiin dhismaha cududda Qaranka, isla markaana ay muhiim tahay in si mug



iyo miisaan leh loo eego duruufaha kala duwan ee ku gaadaaman dhallinyarada;

Markaan Arkay: In dhiiri-gelinta iyo taageerada hal-abuurka iyo curinta dhallinyaradu muhiim u yihiin horumarka iyo dhismaha Qaranka Jamhuuriyadda soomaaliland.

Markaan ku Qancay: In Qaranku baahi weyn u qabo ka faa'iidaydiga maskaxda iyo xooga culayga ah ee dhallinyarada iyo abuurista fursado dhaqaale oo bud-dhig u noqon u noqon kara jihaynta xooga dihin ee dhallinyarada;

Markaan La Tashaday: Laamaha Dawladda ee ay khusayso;

Waxaan soo saaray:

Qodobka 1aad

Aasaaska Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada Jamhuuriyadda Somaaliland

- 1) Waxa halkan lagu aasaasay Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada jamhuuriyadda Somaaliland oo ah sanduuq dhaqaale oo ku shaqayn doona horumarinta ha-abuurka iyo curinta dhallinyarada Dalka
- 2) Sanduuqu waxa uu yeelan doonaa miisaaniyad u gaar ah oo lagu maalgelinayo ganacsiga iyo xirfadaha hal-abuurka ee Dhallinyarada Dalka, taasi oo lagu



siin doon hab dayn ama deeq ahaaneed, oo kolba sida ay ku haboonaato.

- 3) Barnaamijyada sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada waxa gundhig u ah dhiiri gelinta hal-abuurka iyo curinta Dhallinyarada Dalka, si loo horumariyo maskax ahaan iyo dhaqaale ahaan, isla markaana loo helo dhallinyaro ka fayow qabyaalad, balwado iyo ficilada xun-xun, qayb weyna ka qaadata horumarka dhaqan -dhaqaale ee bulshada
- 4) Xarunta guud ee sanduuqa waxay noqonaysaa Caasimadda Jamhuuriyadda Somaaliland ee Hargeysa, hase yeeshee waxa uu sanduuqu laamo ku yeelan karaa Gobolada Dalka haddii loo baahdo.

Qodobka 2aad

Ujeedooyinka Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada

Ujeedooyinka sanduuqa horumarinta dhallinyarada waa:

- 1) Dhiirigalinta iyo gacan qabashada dhallinyarada hal-abuurka iyo curinta leh ee dalka jamhuuriyadda Somaliland.
- 2) Maalgelinta dhallinyarada la yimaada hal-bauur ganacsi iyo xirfadeed ee u baahan gacan qabasho dhaqaale.
- 3) Abuuridda fursado shaqo oo hor leh iyo maalgelinta ganacsiga raandhiiska leh iyo xirfadaha dhallinyarada dalka, si loo gaadho horumar waara.
- 4) Dhiirigelinta ka qayb-qaadashada dhallinyarada ee dhinaca horumarka dhaqan-dhaqaale ee dalka iyo daboolidda baahida dhallinyarada hal-abuurka



ganacsi lihi u qabaan maalgashi dhaqaale oo aan lahayn dul-saar iyo shuruudo maaliyadeed.

- 5) Gacan ka gaysashada in dhallinyaradu abuurtaan shaqooyin una noqon lahaayeen shaqo bixiyeyaal (Employers), halkii ay mar walba ka noqon lahaayeen shaqaale (Employees).

Qodobka 3aad

Shaqooyinka Sanduuqa Horumarinta Dhalliyarada Jamhuuriyadda Soomaaliland.

Masuuliyadda iyo waajibaadyada Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada waxaa ka mid ah;

- 1) In uu dejiyo siyaasadda maalgelinta dhallinyarada hal-abuurka iyo curinta leh ee Dalka Jamhuuriyadda soomaaliland.
- 2) In uu dejiyo, isala markaana curiyo qorsheyaal iyo istraatajijado lagu dhiiri gelinayo dhallinyarada hal-abuurka leh.
- 3) In uu abuuru saaxad dhallinyaada Soomaaliland ku tartami karaan hal-abuurkooda iyo hiniseyaashooda maangalka ah ee maalgelinta u baahan.
- 4) In uu diyaariyo isla markaana fuliyo barnaamijyo dhallinyarad ku soo bandhigayaan fikradahooda, hibooyinkooda iyo curintooda maskaxeed.
- 5) In uu dhallinyarada ku tartansiiyo hal-abuurka iyo curinta fikradaha ganacsi ee maalgelinta iyo dhiirigelinta u baahan.
- 6) In uu baahiyo isla markaana xayaysiiyo barnaamijyo maalgelined oo loogu talagalay in dhallinta hal-



abuurka leh iyo curinta maskaxeed leh lagu abaal mariyo laguna maalgeliyo.

- 7) In uu maalgelin lacageed iyo mid niyadeedba siiyo dhallinta hal-abuurka iyo curinta leh ee ku guulaysta barnaamijyada maalgelinta ah.
- 8) In uu dhallinyarada Soomaaliland tuso in Qaranku u baahan yahay maskaxdooda iyo muruqoodaba lana abuurto saaxad dhallinyaradu kaga qayb galaan horumarka dalka.
- 9) In uu ku wacyi geliyo bulshada ujeedada iyo faa'iidooyinka sanduuqa horumarinta Soomaaliland.
- 10) In uu talooyin Madaxweynaha ka siiyo siyaasadaha iyo qorshayaasha lagu hormarinayo hal-abuurka iyo curinta faa'iidada leh ee ay la yimaadaan Dhallinyarada soomaaliland.
- 11) In uu diyaariyo war-bixinta sanduuqa, una gudbiyo madaxweynaha iyo meelaha kale ee sharcigu waajibiyo.
- 12) In uu wada-shaqayn dhow iyo iskaashi la yeesho Hay'adaha qaranka Hay'adaha Caalamiga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee shaqo -wadaagta yihiin, raadiyaan barnaamijyo lagu maalgelinayo dhallinyarada hal-abuurka leh ee dalka.
- 13) In uu qaado tallaabo kasta oo uu ku xaqiijinayo hirgelinta ujeedooyinka loo abuuraysanduuqa horumarinta dhallinyarada JSL.



Qodobka 4aad

Qaab dhismeedka maamulka sanduuqa.

1) Sanduuqa Horumarinta dhallinyaradda Jamhuuriyadda soomaaliland waxa uu yeelanayaa guddi sare oo maamul (**Board of Directors**) oo ka kooban.

- a) Wasiirka wasaaradda dhallinyarada iyo ciyaaraha =**Guddoomiye**=
- b) Guddoomiyaha Gaboodka Haweenka ee Nagaad =**G/KU-Xigeen**=
- c) Guddomiyaha Dalladda Dhalinyarada Somaaliland ee SONYO =**Xoghaye**=
- d) Wasiirka Horumarinta Maalgashiga = **Xubin**=
- e) Wasiirka Shaqo gelinta iyo Horumarinta Arrimaha Bulshada = **Xubin**=
- f) Guddomiyaha Rugta Ganacsiga =**Xubin**=
- g) Laba Xubnood- (Qaadhaan –bixiyeyaasha) = **Xubin**=
- h) Saddex Xubnood – Shirkadaha waaweyn ee dalka =**Xubin** =

2) Xubnaha ay soo magcaabaan Qaadhaan Bixiyeyaasha Caalamiga ah, waxay u soo gudbinayaan Guddoomiyaha Gudidda sare ee Sanduuqa horumarinta Somaliland ahna Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Cayaaraha Somaliland

3) Xubnaha ay soo magcaabaan Qaadhaan Bixiyeyaasha Caalamiga ah, waxay u soo gudbinayaan Guddoomiyaha Gudidda sare ee Sanduuqa horumarinta Somaliland ahna Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Cayaaraha Somaliland.

4) Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada Jamhuuriyadda Somaaliland waxa uu yeelanayaa



Agaasime fulineed, oo uu soo magcaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 5aad

Shaqooyinka Guddida sare ee Sanduuqa.

Shaqooyinka Guddida sare ee Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada waxaa ka mid ah;

- 1) Hogaaminta guud ee sanduuqa iyo dejinta, hubinta iyo hirgelinta siyaasaddaha iyo qorshayaasha dhaqaajinta sanduuqa.
- 2) Dejinta siyaasadaha iyo qorshayaasha lagu maalgelinayo Hal-abuurka Dhallinyarada Somaliland ee sanduuqu ku shaqaynayo
- 3) Hubinta in dhaqaalaha sanduuqa loo isticmaalay hawlihii loogu talo galay, loona isticmaalay si waafaqsan Xeerka iyo qorshe yaasha loo dejiyey barnaamijka Sanduuqa
- 4) In ay masuul ka noqdaan hagidda, maamulidda, ddaba-galka, qiimaynta iyo kor kala socoshada dhammaan fulinta hawlaha iyo mashaariicda uu sanduuqu hir gelinayo.
- 5) In ay hagaan, hoggaamiyaan islamarkaana la xisaabtamaan Agaasimaha fulinta ee sanduuqa horumarinta dhallinyarada, si loo sugo fulinta hawlihii la qorsheeyey,
- 6) In ay qabtaan shaqo kasta oo kale oo Madxweynaha JSL u igmado.



Qodobka 6aad

Agaasimaha Fulinta ee Sanduuqa

- 1) Awoodaha shaqo ee Agaasimaha fulinta waxaa ka mid ah:
 - a) Hogaaminta guud ee hawl-maalmeed Sanduuqa horumarinta Dhallinyarada
 - b) Socod-siinta, hagista iyo maamulidda dhammaan hawlaha sanduuqu u xil –saan yahay ee awooddisa ah, islamarkaana ay ansixiyen Golaha sare ee sanduuqu.
 - c) Maamulka iyo maaraynta hawl-maalmeedka shaqo ee sanduuqa
 - d) Fulinta siyaasadaha, qorshayaasha iyo barnaamijyada sanduuqa horumarint dhallin yarada ee ay dejiyeen Guddiga sare ee sanduuqu
 - e) Qorshaynta, qaabaynta iyo fulinta hawlaha sanduuqa, kadib marka ay u ansixiyaan Guddiga sare
 - f) Diyaarinta miisaaniyadda iyo kharashaadka sanduuqu u baahan yahay; iyo u gudbinta Guddida sare, si loo ansixiyo.
 - g) Diyaarinta warbixinaha kala duwan ee sanduuqa horumarinta dhallinyarada
 - h) Diyaarinta fagaareyaasha lagu soo bandhigaayo hindiseyaasha iyo hal-abuurada dhallinyarada dalka
 - i) Wacyi-gelinta iyo dhiirigelinta hal-abuurka iyo curinta fikradaha ganacsiga iyo xirfadaha dhallinyarada



- j)** Qabashada tartamada lagu xulanayo dhallinyarada hal-abuurka ganacsi la timaada.
- k)** Ka hawl-gelida in dhaqaale iyo deeqo loo helo sanduuqa
- l)** Fulinta dhammaan go'aamada. wareegtooyinka, qorsheyaasha iyo tallabooyinka maamul ee ka yimaad Guddida sare
- m)** Diyaarinta war-bixinaha sanduuqa oo bille, sadex biloodleh iyo sannadleh ah, waxaana loo gudbinayaa Guddida sare ee sanduuqa horumarinta dhallinyarada
- n)** Fulinta shaqooyinka ay Guddida sare ee sanduuqu u igmato.

Qodobka 7aad

Dhaqaalaha Sanduuqa

Dhaqaalaha Sanduuqa Horumarinta Dhallinyaradu waxa uu ka kala imanayaa ilaha dhaqaale ee kala ah:

- 1) Qoondada Miisaaniyadda Qaranka.
- 2) Kaalmooyinka iyo tabarucaadka ganacsatada iyo muwaadiniinta.
- 3) Deeqaha Qaadhaan-bixiyayaasha Caalamiga ah.
- 4) Deymaha si sharciga waafaqsan loo qaato, IWM.

Qodobka 8aad

Hab-Xisaabeedka Sanduuqa

- 1) Sanduuqa Horumarinta Dhallinyaradu waxa uu ka furan karaa Lambar Xisaabeed (Bank Accounts) Baananka Dalka.



- 2) Qaab-xisaabeedka Sanduuqu waa inuu ahaade mid sax ah oo hufan, isla markaana ay ka muuqato dakhliga iyo kharashka, taas oo ku salaysan hannaan xisaabeedka dalka.
- 3) Dhammaan Lambar Xisaabaadka Sanduuqa ee ka furan Baananka waxa uu yeelanayaa laba saxeex oo kala ah Guddoomiyaha Guddida Sare iyo Agaasimaha Fulinta ee Sanduuqa.

Qodobka 9aad

Xisaab-xidhka Sanduuqa

- 1) Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada waxaa ku waajib ah in uu sameeyo xisaab xidh saddex bilood ah, oo ay ku xusan tahay:
 - a) Cadayn xisaab xidhka iyo hadhaaga xisaabadka lacageed, hadduu jiro.
 - b) Caddaynta Hawlaha Shaqo ee ay ku baxeen kharashaadka baxay.
- 2) Sanduuqu waa in uu xisaab-xidhkiisa u gudbiyo Guddida Sare, Guddida Sarena ay u gudbiyaan Madaxweynaha, Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda iyo Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-481/032020

Taar: 07/03/2020

Wareegto Madaxweyne

Saamaxaad

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
somaliland, Qodobka 90aad
xubintiisa 5aad;

Markaan Arkay: Xeerka Ciqaabta Guud,
Qodobkiisa 144aad;

Markaan Arkay: Qoraalka Xeer-ilaaliyaha Guud ee
Qaranka ee summaddiisu tahay
XIG/JSL/41/2020, kuna
taariikhaysan 02/03/2020;

Markaan Tixgeliyey: Codsiga saamaxaadda ah ee ku
taariikhaysan 17/02/2020;

Markaan La-tashaday: Hay'adaha ay Khuseyso;

Waxaan go'aamiyey

In aan saamaxaad u fidiyo Cismaan Sheekh Maxamed Isaaq:

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-483/032020

Taar: 07/03/2020

Ku: Cabdi Cabdillaahi Xasan
Maareeye Ku-xigeenkii hore ee Dekedaha
Somaliland

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Sida aad la socoto, xilka qaranka ayey sunnihiisa tahay in uu meerto noqdo, oo loo igmado hadba ciddii hanan karta. Sidaa darted, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad u haysay Qaranka.

Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad haysay xilkaa Qaran.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-484/032020

Taar: 07/03/2020

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
Soomaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waaya-
aragnimadiisa;

Markaan Ku Qancay: In uu Hanan karo Masuuliyadda
ka Dhalanaysa Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Cumar Abokor Jaamac, laga Bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado Maareeye Ku-xigeenka Dekedaha
Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/G/083-488/032020

Taar: 14/03/2020

Ku:	Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka	Hargeysa
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha	Hargeysa
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka	Hargeysa
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta	Hargeysa
Ku:	Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska	Hargeysa

Ujeedo: Magacaabid Guddi

Mudanayaal,

Sida aad la socotaan, waxa aynu Qaran ahaan hore u qaaday tallaabooyinka aynu kaga hor-tagayno xanuunka saf-marka noqday, adduunkana ku sii faafaya ee Coronavirus (Covid 19). Waxa aynu abaabul xoogan iyo heeganba galinnay Shaqaalaha Wasaaradaha Horumarinta Caafimaadka oo baadhitaanno iyo hubin ka bilaabay dhammaan Madaarada diyaaradaha, Dekedaha iyo xuduudaha dalka laga soo galo. Hase yeeshee, waxa loo baahan yahay dadaal, diyaar-garaw iyo ka-hor-tag intaa ka badan.

Sidaa darteed, waxaan idiin magacaabay Guddida Heer Qaran ee U-diyaar-garawga iyo Ka-hor-tagga Xanuunka Coronavirus (Covid-19), waxaana xidhiidhka wada-



shaqaynta Guddida hoggaamin doona Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka.

Waxan idinka rajaynayaa in aad xil weyn oo culus iska saari doontaan u diyaar-garawga iyo ka hor-tagga xanuunka Coronavirus.

Allaa Mahadleh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland